Page 2

Banaanka (dibada)

Side u xafidan kartaa boorsadaada jeebka/lacagta

- Ha qaadanin lacag ka badan inta aad u baahnatahay
- Lacagta dadka ha tus-tusin.
- Xaqiiqso in boorsada ay gudaha ku leedahay jeeb – haddii aysan lahayn waa lagu toil karaa.
- Boorsada gacanta dhinaca laga xiro gudaha soo marsii – iskana xir.
- Boorsada gacanta haddii ay ku jirto boorsada jeebka ha saarin gaariga lagu adeegto ama kursiga socda .
- Ka taxadar inaad boorsada u xirtid si fiican, jiid shinyeeriga.
- Baro sida biilasha loogu bixiyo jiiroo.
- markaad lacag la soo baxeysid isticmaal karaka bangiga – ku dadaal in nambarkaaga sirta ah aan lagaa arkin lacagtana si fiican u xafid.
- Lacagta kala qaybi, xoogaa xoogaa meelo badan ku kala rid.
- Nambar sirta iyo karaka isku meel haku ridin – waa wax qaali ah!

waxaa wanaagsan in aad Yareysid soo saarida boorsada.

Waxaa wanaagsan in boorsada soo bix-bixitaankeeda aad yareysid. Tusaale liiska waxa aad soo iibsaneysid jeebka ku haayso boorsada ha gelinin. Ku dadaal in aadan boorsada jeebka ama gacanta aadan ku ridin nambaro muhiim ah sida taleefoon nambar ama nambarka koodka iwm.

Ookiyaalaha(muraayadaha) jeebka ku heyso si aadan mar walba boorsada u furin si aad ugala soo baxdid.

Page 3

Taxadar aad u badan samee

- Markaad bankomaatka lacag kala soo baxeysid ama bangigaba.
- Qatarta waxay aad u badantahay marka dad badan uu meesha joogo, sida marka basla la koraayo ama laga degaayo, gelida dukaanka ama ka bixida
- Miiska furutada, miiska hilibka ama caanaha – oo ah meelaha aad ku foorarsaneysid oo boorsada aad iska jeedineysid waa meelaha aad taxadarka ku dhumineysid.
- Ka taxadar xataa marka aad ku jirtid safka kaasada ama meelaha kale ee ciriiriga ah.
- Si fiican iskaga fiiri in baaqi sax ah laguu soo celiyo. Iska fiiri inaan laguu soo celinin baaqi boqol koroon ah adoo bixiyay shan boqol

Tuugada wax jeebsiibta waa ku mashquulinaayaan intaan boorsada lagaa xadin badanaa koox-koox ayay u socdaan. Habka tuugada jeebsiibka ay isticmaalaan waa aygoo qofka waxyaabo kale ku mashquuliya.

dadka agtaada jooga iska ilaali. Waxay xiiseeyaan!
Indhaha
inay isku dhacaan ka dibna xiriir iyo sheeko been ah la bilaabo.

Ka fakir in indhaha ay sheegaan waxyaabo badan.
Indho aan jeesaneynin waxay calaamo u yihiin
inuu rabo inuu ku maamulo adna aad tustid jileec.

Haddii ay wax kugu dhacaan waxaa wanaagsan in aad qofka si fiican u tilmaami kartid. Waayo waxay sahleysaa hawsha booliska.

Isku day inaan lagu sii jeedinin

Page 4

Boorsada haddii la waayo?

Isla markaad ogaatid in boorsadaada ay maqan tahay: isla markiiba la xiriir qof kaa caawiya in kaararka lagaa xiro booliskana kuu waca. Haddii tuuga meesha uusan ka fogeyn – isla markaaba la xiriir booliska. Adoo deggan isku day inaad sheegto siday wax u dhaceen, waxa aad aragtay. Waa sida ugu wanaagsan oo maskaxda looga shaqeysiiyo, si markale aad booliska ugu sheegtid sida ay wax u dhaceen.

Boorso dafid

Boors dafida macnaheedu waa in qof boorsada kaala ordo – qofkaas isagoo ordaaya ama baaskiil wata ama mooto wata ayuu ku soo galaayaa. Badanaa waxay ka dhacdaa meelaha cidlada ah waxaana sameeya labo qofood. Sharciyan boors dafida waxay xisaaban tahay dhac waayo xoog ayaa la isticmaalaayaa.

- Ha is adkeynin! Lacag makuu soo celineyso feer ama lafo kaa jabay.
- Furayaasha ku rido meel kale aan ahayn boorsada–lacagtana ku rido jeebka hoose!
- Waxaa lagula talinaayaa boorsada xariga leh ee dadab xabadka loogu xirto.
- Markaad mareysid marshabiyeediga – boorsada ha marin dhinaca baaskiilada maraayaan.
- Boorsada gacana ama jeebka ha gelinin gaariga adeega ama kursiga lagu socdo.



Lacag makuu soo celineyso lug jabtay.

Page 5

Gudaha guriga

Qof taleefoon kuu soo diray haduu ku yiraahdo bangiga ayaan kaa soo wacaa marnaba ha siinin nambarka koontadaada ama koodkaaga. Waayo bangiyada habkaas dadka uma soo wacaan.

Haddii qof ku soo waco oo uu ku yiraahdo waxaan nahay qaraabo adna aadan aqoonin weligaa lacag amah ah ha siinin.

Si ay guriga ku soo galaan tuuga ama tuugada waxay isticmaalaan habab kala duwan. Tusaale ahaan dadka waaweyn qof ayaa mashquulinaayo kan kalena intuu dhuunto ayuu wax soo xadaayaa. Habka ay isticmaalaan waa:

- Waxay weydiisanaayaan koob biyo ah
- Waxay rabaan inay jikada soo galaan oo aqbaar ay u qoraan jiiraanka.
- Waxay ku tusaayaan katiifado ama dhar.
- waxay leeyihiin waxaan u shaqeynaa degmada guriga ayaan ka shaqeyneynaa ama waxbaan hagaajineynaa
- Feejignoow haddii qof uu kaa soo daba galo guriga iridkiisa hore.
- Boorsada gacanta ama jeebka ha dhigin jaranjarta agteeda!
- Iridka ku dheji bikaaco iyo silsilad ado isticmaalaaya qof qibrad u leh.
- Amaankaaga daraadiis isticmaal silsilada iridka
- Iska ilaalli qofka aad gudaha soo gelineysid.
- Iridka waxba haka gadanin – waayo waxaad tuseysaa in lacag guriga kuu taalo.



Is muuji tus inaad guriga joogtid

Page 6

- Iridka haddii la soo garaaco, is muuji waayo waxaad tuseysaa inaad guriga joogtid.
- Weydii qofkuu yahay, haday yiraahdaan waxaan nahay farsamo yaqaan weydii waraaqda aqoonsiga shaqada.
- Farsamo yaqaan taleefoon ayuu soo diraayaa inta uusan imaanin.
- Weydii aqoonsigooda qolyaha guriga kaa caawinaaya.
- Qof aadan aqoon iridka haka furin.
- Lacag badan guriga haku haysan.
- Dahabka iyo lacagta meelo kala duwan u kala qaybi si aan si sahal ah loogu helin.
- Haddii aad meel aadeysid la socodsii jiiraankaaga.
- Haddii mudo dheer aad maqnaaneysid-qof kala dardaaran inuu boostada kuu ururiyo
- Nambarka soo baxaaya waxa uu ka fiican yahay cajalada dhawaaqeysa marka taleefoon la soo garaaco

Guriga la dhaco?

Isla markiiba booliska wac! Sharax qofka sifiicana u sheeg, inta qofood ay ahaayeen, sideey u ekaayeen iyo meesha ay u baxsadeen. Haddii ay gaari ku baxsadeen – sedee ayuu u ekaa?

Page 7

Yaa ugu Qatar badan in la dhaco?
Qofka wax matoor leh haysta?

- Baabuurka mar walba xir.
- Waxba baabuurka haku xirin, hadaad sameysid yaan la arkin.
- Haday suurto gal tahay isticmaal alaarmi.
- Isticmaal qufulka isteerinka.
- Gaariga dhigo meel iftiin leh/ ama dadka ku badan yahay.
- Isticmaal garaash-laakiin ku feker in garaashyada waaweyn ay tuugada soo jiitaan

Gaariga dhigo meel iftiin leh.



Dhaca duqoowshaha loo geysto waxaa ka mid ah jeebsiibka, boorso dafida iyo guri jabsashada.” dhaca dadka waaweyn waxaa laga wadaa ”xatooyo aan wax la jebinin kaasoo tuuga uu ka faa’ideysanaayo qofka weyn daciifnimadiisa ama qofkii oo aan iska difaaci karin da’diisa oo weyn daraadeed”.

Booliis: wac 112 haddii aad rabtid in booliiska uu deg deg kuugu yimaado wac 114 14 haddii aad talo u baahantahay oo wax deg deg ah aysan jirin.
Taleefoonadaan waxay ka shaqeeyaan wadanka oo dhan.
xiritaan: maxaad sameyneysaa si aad u xirtid koontadaada, buuga bangiga iwm? Hawshaan bangiyada way ku kala duwan yihiin. Haddii shaki kugu jiro-la xiriir boolioska ayagaa og waxaad sameyneysid.
Brottsofferjouren: (ururka u dooda dhibaneyaasha) Wac 0200-212019.
Waxay kuu sameynaayaan adeeg lacag la'aan ah haddii:

-Aad u baahantahay talo iyo caawimaad
- Aad u baahantahay inaad la xiriirtid xafiisyada dowlada ama caymisyada.
- Aad u baahan tahay kaalmo inta maxkamada ay socoto

Caymisyada: iska ogoow nooca caymiska aad ku jirtid.

Talo & waano ku socota dadka waaweyn

Ujeedada in la kordhiyo badbaadada isla markaana la dhimo dhibaatooyinka iyo dembiyada.